

Barnaamijka Baaritaanka, Qiimeynta iyo Dayactirka (DIAR)



*Iyadoo ka qayb ah sida ay
nooga go'an tahay bixinta tamar
badbaado leh oo la isku hallayn
karo, waxaanu xilli hore wax ka
qabannaa halista dabka.*

Barnaamijka Baaritaanka, Qiimeynta iyo Hagaajinta ee loo adeegsado aaladda Daroonka (DIAR) wuxuu qayb ka yahay dadaalada Qorshaha Yaraynta Dabka Keymaha ee SDG&E. Barnaamijka DIAR wuxuu kobcinaya qimaynta xarkaha korontada ee la mariyo hawada ee SDG&E iyo qalabka gudaha ee ku rakiban Dabka ay Awooddiisu Sarreysa ee ka jira aaggaga Heerka 3 ee la aqoonsaday (fiiri khariidadda gadaasha).

Sida ay nooga go'an tahay bixinta tamar nadiif ah, badbaado leh, oo la isku hallayn karo waxay ka dhigan tahay baaritaano iyo qiimayno joogto ah oonu ku samayno xarkahayaga quwadda korontada.

Xog ku Saabsan Barnaamijka DIAR


Iyadoo taageero laga gerysanayo Barnaamijka Yaraynta Dabka Keymaha ee SDG&E, Barnaamijka DIAR wuxuu qiimayn doonaa xarkaha quwadda korontada SDG&E® isagoo isticmaalaya teknoolojiyadda loo adeegsado aaladda daroonka si loo aqoonsado dayactirrada ama hagaajinaha daruuriga ah loona yareeyo halista dabka keymaha.

Waxyabaha la filayo

Shaqaalaha SDG&E iyo/ama qandaraaslayaashayada la ansixiyey waxay ku samayn doonaaan qiimayn dhammaystiran xarkaha quwadda korontada ee cirka mara ama kuwa mara meel u dhaw goobtaada iyago isticmaalaya teknoolojiyadda daroonka.

Si ay u dhammaystiraan qiimayntan, shaqaalaha iyo/ama qandaraaslayaasha SDG&E waxay u baahan doonaaan inay galaangal u yeeshaan isticmaalka xarkaheena quwadda korontada iyo goobaha Rights-of-Way ee ku yaala ama u dhaw goobtaada.

Aaladda Daroonada ayaa loo isticmaali doonaa in lagu qaado sawirrada qalabka korontada ee SDG&E kuwaasi oo ay qiimayn doonaaan shaqaalaha SDG&E. Ujeedada barnaamiju waa qaadista sawirrada qalabka SDG&E laakiin maaha meelaha




ku hareeraysan. Fadlan ka eeg tusaalooyinka nooca sawirrada SDG&E ay qaadi doonaan bogga dambe ee dukumeentigan. Hawlaha daroonka la xiriiraa waxaa dhici karta inay si kumeel gaar ah u kordhiyan heerarka buuqa ama boorka.

Inta qiimaynta daroonku socoto, adeeggaaga korontada wax kala go' ah ku iman maayo. Qiimayntan ayaa dhici doonta laga bilaabo bilowga dayrta waxayna socon doontaa ilaa dhammaadka 2020.

Xog ku saabsan Ciwaanka Lala soo Xiriirayo

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan wac Khadka Tooska ah ee Macluumaadka Mashruuca oo bilaash ah **1-844-765-6388**, ama boqo websaytka Barnaamijka DIAR sdge.com/drone-program.

Khariiradda degmooyinka khatarta dabku sarrayso



**Tusaalayaasha sawirrada lagu qaaday Barnaamijka
Daroonka ama DIAR**

